

Tallaalada loogu talagalay Dhallaanka

Hagaha Waalidiinta

Kuwan ayaa ah tallaalada cunugaagu u baahan yahay!

Xiliga dhalasahda ^{1,2}	HepB	RSV-mAb ¹ 0-7 bilood
2 bilood ^{1,2}	HepB ¹ 1-2 bilood ²	+ DTaP + PCV + Hib + Tallaalka Dabaysha + RV
4 bilood ^{1,2}	HepB ³	+ DTaP + PCV + Hib + Tallaalka Dabaysha + RV
6 bilood ^{1,2}	HepB ¹ 6-18 bilood ²	+ DTaP + PCV + Hib ⁴ + Tallaalka Dabaysha ^{6-18 bilood²} + RV ⁵ + Hargabka ⁶ + COVID ⁷
12 bilood iyo ka weyn ^{1,2}	MMR ¹ 12-15 bilood ²	+ DTaP ¹ 15-18 bilood ² + PCV ¹ 12-15 bilood ² + Hib ¹ 12-15 bilood ² + Tallaalka Busbuska ¹ 12-15 bilood ² + HepA ⁸ 12-23 bilood ² + Hargabka ⁶

Ka hubso dhakhtarkaaga ama kalkalisadaada si aad u xaqijiso in cunugaaga helayo dhammaan tallaalada waqtiga saxda ah. Marar badan tallaalada ayaa la isku daraa si loo yareeyo tirada duritaanada. Xaqiji inaad codsato kaarka diiwaanka oo ay ku qoran yihiin taariikhaha tallaalada cunugaaga; la imow kani booqasho kasta.

Halkani waxaa ah liiska cudurrada cunugaaga laga ilaalin doono:

HepB: cagaarshowga B, oo ah cudur beerka ku dhaca oo halis ah

DTaP: gawracatada, teetanada, iyo xiiqdheerta (xiqleyda)

PCV: tallaalka pneumococcal conjugate wuxuu kahortagaa caabuq halis ah oo ku dhaca dhiiga, sambabada, iyo maskaxda

Hib: *Haemophilus influenzae* nooca b, oo ah caabuq halis ah oo ku dhaca maskaxda, cunaha, iyo dhiiga

Dabaysha: dabaysha, oo ah cudur halis ah oo keeno curyaanimo

RSV: respiratory syncytial virus (fayraska sababa cudurka neef-mareenka), oo ah caabuq halis ah oo ku dhaca sambabada

RV: caabuqa rotavirus, oo ah cudur shuban oo halis ah

Hargabka: caabuq daran oo ku dhaca sambabada

MMR: jadeecada, qaamo-qashiirta, iyo rubella

COVID-19: cudur halis ah oo aad u faafa

HepA: cagaarshowga A, oo ah cudur beerka ku dhaca oo halis ah

Busbuska: sidoo kale loo yaqaan varicella

Qoraallo khuseeyaa shaxda sare:

1. Laga bilaabo Oktoobar ilaa Maarsro, dhallaanka markaa dhashay ilaa kuwa jira 7 bilood waxay u baahan karaan difaaca kahortagga cudurada ee RSV (RSV-mAb) haddii aan tallaalka RSV la qaadaan xilliga uurka. Qaar ka mid ah dhallaanka waaweyn ee da'doodu u dhaxayso 8 ilaa 19 bilood ayaa laga yaabaa inay u baahdaan RSV-mAb inta laguguda jiro xilligooda labaad ee RSV.
2. Tani waa qiyaasta da'da ee ay tahay in tallaalkan la bixiyo.
3. Cunugaaga ayaa laga yaabaa inuusan u baahan garoojo ah tallaalka HepB marka uu jiro 4 bilood, waxayna tani oo ku xiran tahay tallaalka la isticmaalayo. Ka hubso dhakhtarkaaga ama kalkalisadaada caafimaadka.
4. Cunugaaga ayaa laga yaabaa inuusan u baahan garoojo ah tallaalka Hib marka uu jiro 6 bilood, waxayna tani oo ku xiran tahay tallaalka la isticmaalayo. Ka hubso dhakhtarkaaga ama kalkalisadaada caafimaadka.
5. Cunugaaga ayaa laga yaabaa inuusan u baahan garoojo ah tallaalka RV marka uu jiro 6 bilood, waxayna tani oo ku xiran tahay tallaalka la isticmaalayo. Ka hubso dhakhtarkaaga ama kalkalisadaada caafimaadka.
6. Dhammaan carruurtu da'doodu tahay 6 bilood iyo ka weyn waa in laga tallaalaah hargabka inta lagu gudajira dayrtaa ama jiilaalka sannad kasta.
7. Cunugaagu wuxuu u baahan doonaa 2 ama 3 garoojooyin, taasoo ku xiran nooca tallaalka COVID-19 ee la siinayo.
8. Cunugaagu wuxuu u baahan doonaa 2 garoojooyin oo ah tallaalka HepA, oo la siinayo muddo ay udhaxeyso ugu yaraan 6 bilood.

